Region Halland

Macluumaadka loogu tala galay dadka loo qoray qalabka wax caawiya

Soo amaahashada qalabyada wax caawiya
Waxaad qalabka wax caawiya kasoo amaahatay Region Halland. Qalabka wax caawiya adiga ayaa si khaas ah luguugu tala galay mana daymin kartid, ama gadi kartid ama uma wareejin kartid qof kale. Adiga ama qoyskaaga/koriyahaaga ayaa ka masuul ah qalabka inta aad gacanta ku hayso.

Ayadoo xiriir la leh inta aad gacanta ku hayso qalabka wax caawiyo, faahfaahintaada shakhsiyadeed waxaa lagu diiwaan galin doonaa hannaanka kombuyuutarka ee Hjälpmedelscentrum Region Halland waxa ay ilaalinaysaa sirtaada.
Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sida Region Halland uu u samaynayo faahfihintaada shakhsiyadeed ayaa ku diyaarsan (luuqadda Iswiidhan) www.regionhalland.se/dataskydd

Tafaasiisha Shaqada, macluumaad kale iyo xanaano
Waa masuuliyaddaada, in aad isticmaasho, aad ilaaliso aadna nadiifiso qalabka si waafaqsan tafaasiisha shaqada iyo tafaasiisha uu ku siiyo qofka ku qoray iyo shaqaalaha jooga Hjälpmedelscentrum. Tani waxay hubinaysa in qalabku u shaqeeyo si caadi ah aanan lagu samayn xirasho aan caadi ahayn (tusaale hubi inaad dabayso batariyada, nadiifiso qalabka, aaryeyso taagyarka). Waa in qalabka lagu kaydiyaa meel ku haboon si waafaqsan tafaasiil kasta oo khaas ah. Waa in aadan ku samayn wax diyaarin ama wax ka badal qalabka. Hadii laguu qoray kursiga cuuryaanka oo elektoroonig ah, waxaan sidoo kale balan qaadayaa inaan dhigo meel qufulanta oo ugu yaraan heerkulkeedu yahay +5 digree C.

Masuuliyadda bixinta wax yeellada
Waxay noqonkartaa masuuliyaddaada in aad bixiso waxyeellada haddii ay qalabka wax yeelleeyaan wax ka badan wax loo tixgalin karo in ay yihiin duugoobid iyo dillaac caadi ah, haddii aad lumiso ayada oo ay sabab u tahay dayac ama haddii aadan soo celin marka uu kaa codsado qofka kuu qoray. Wax ay sidoo kale noqon kartaa masuuliyaddaada in aad bixiso haddii aadan u isticmaalin qalabka wax caawiya sida saxda ah ama aadan raacin macluumaadka kale ee buugga ku qoran.

Badalidda deegaanka
Kala xiriir qofka kuu qoray waqti wanaagsan macluumaadka ku saabsan sida qalabka wax caawiya uu kuula socon lahaa marka aad soconayso iyo sharciyada khuseeya.

Soo celinta qalab wax caawiya
Marka aadan usii baahnayn in aad sii isticmaasho qalabka wax caawiya ama marka lagu weydiiyo in aad soo celiso, waa in aad isla markaba soo celiso, ilaali si adag na u ugu nadiifi xarunta caafimaad ee kuugu dhow ama mid kamid ah unugyada Hjälpmedelscentrum ee ku yaalla Halmstad, Varberg ama Kungsbacka. Hadii aad u baahan tahay caawinaad daabulidda qalabka weyn ama faraha badan inta lagu guda jiro hannaanka soo celinta, waxaad la xariiraysaa qofka kuu qoray. Haddii ay jirto khatar, fadlan war gali unugga marka aad qalabka wax caawiya ku celinayso halkaas.

Marka aad safrayso
Haddii qalabka wax caawiya uu wax yeelloobo marka aad safrayso, tusaale marka aad ku safrayso diyaarad, tareen ama adeeg taksi oo loogu tala galay dadka curyaamada ah ama duqoobay, warbixin dacwo ah ayay tahay in loo gudbiyo shakhsi si toos ah duulimaadka/xamuulka ama wax u dhigma, sidaa si lamid ah shirkadda caymiskaaga. Had iyo jeer la xiriir qofka kuu qoray. Xatooyada iyo wax yeellada qalabka wax caawiya waa in lagu war galiyaa booliska, iyo wargalin la siiyo qofka kuu qoray. Kharashka qaadidda iyo kharashka wax kasta oo dayactir ah ee loo baahdo inta lagu guda jiro waqtiga aad dibadda ku maqan tahay ma daboolayo bixiyahaaga caafimaadka. Dadka amaahanaya qalabka waxay masuul kayihiin in ay naftooda ka daboolaan kharashaadkan ama in ay u maraan siyaasadda caymiska. Haddii qalabka wax caawiya la dayactiro inta aad dibadda jirto, fadlan la xiriir Hjälpmedelscentrum. Ka hor inta aadan bookhan dibadda, waxaad la xiriiri kartaa

Hjälpmedelscentrum (ugu yaraan 14 maalmood oo shaqo inta aadan safrin) si aad u diyaariso in la hubiyo qalabkaaga.

Caymiska
Waxaa laguugula talinayaa in aad dib u eegto daboolidda caymiskaaga si aad u hubiso in ay daboosho, tusaale ahaan, xatooyada, dabka iyo waxyeellada aan hory u dhicin ee qalabka. Xatooyada iyo wax yeellada qalabka wax caawiya waa in lagu war galiyaa booliska, iyo wargalin la siiyo qofka kuu qoray.

Caymiska, sii socda
Waxaad sidoo kale masuul ka tahay waxkasta oo waxyeello/khasaare ah ama dhaawac saamaynaya qof kale ama hantidooda ee kujira shuruuc loo isticmaali karo oo khusaysa waxyeellooyinka. Hjälpmedelscentrum (Xarunta Caawinta Teknooloojiyadda) sidaa darteed waxay ku faraysaa in aad hubiso daboolitaanka caymiskaaga, khaasatan tan khusaysa baabuurta curyaamada ee korontada ku shaqeeya iyo qalabka wax caawiya kuwaasoo dhaqaale ahaan qiimo sare leh. Haddii aad hayso wax su`aal ah ama ku lug leh dhacdo ama shil qalabkaaga caawiyaha ah, fadlan la xiriir qofka kuu qoray.

Dayactirka
Haddii qalabka wax caawiyaa uu u baahan yahay dayactir, fadlan la xiriir Hjälpmedelscentrum. Haddii aad u malaynayso in khaladku uu saamayn karo badqabkaaga, ha isticmaalin qalabka wax caawiya ilaa laga dayactirayo. Qalabka wax caawiyaa waa in laga dhigaa mid farsamayaqaanada dayactirku ay gaari karaan, tusaale qalab kasta oo guriga yaalla iyo waxyaabaha waa in laga wareejiyo waddada si farsama yaqaannadu ay u helaan waddo ay ku gaari karaan. Region Halland ma bixinayso dayctirka ay sababta u yihiin waxyeellada ka dhasha waxyaabaha kugu xeeran, tusaale waxyeellada ka dhacda gurigaaga, taasoo ay sababtay isticmaalidda qalabka.

Adeegga wicitaanka
Adeegga wicitaanka ee qalabka wax caawiya waxa uu diyaar yahay inta u dhaxeysa 8da subaxnimo iyo 4ta galabnimo maalmaha Sabtida, Axadda iyo fasaxyada dadweynaha. Adeegga wicitaanka waxaa loogu tala galay xaaladaha degdega ah ee gudaha Hollan kuwaasoo loo baahan yahay in la xalliyo ayada oo aan la dib dhigin, meeshii laga sugi lahaa ilaa laga gaarayo asbuuc dhammaadka ugu horreeya asbuuc dhammaad kaddib ama fasaxa dadweynaha. Khaladaadka mararka qaar waxaa loo xallin karaa si kumeel gaar ah kaddibna waxaa loo dayactiri karaa si joogtaysan kaddib asbuuc dhammaadka ama fasaxa dadweynaha. Qalabyada wax caawiya ee uu daboolo adeegga wicitaanku waa wiishashka shkhsiga, sariiraha iyo qalabyada kale oo loo baahdo si loo hubiyo in aad leedahay awoodda aad ku qaban karto howlaha aasaasiga u ah noloshaada maalin laha ah. Farsamayaqaan qalabka wax caawiya ah oo ka socda Hjälpmedelscentrum ayaa qiimaynaya in loo baahan yahay in ficil la qaado iyo in kale. Si aad ula xiriirto farsamayaqaanka shaqada, waxaad ka wici kartaa guddiga xarunta Region Halland 035-13 10 00.

Macluumaadka xiriir ee Region Holland Hjälpmedelscentrum (Xarunta Caawinta Teknoolojiyadda)

Telefoon. 010-47 619 30

Maalmaha usbuuca ee aan ahayn fasaxa 8da subaxnimo -12 ka duhurnimo iyo1da duhurnimo - 4 ta galabnimo.

www.1177.se/Halland

Region Halland

Heshiiska ku saabsan waajibaadka marka la amaahanayo qalabyada wax caawiya

Qalabka wax caawiya ee la qoray:
_____

Lambarka qalabka: _____

Magaca Cida Amaahatay: _____

Lambarka aqoonsiga shakhsi ahaaneed ee qofka amaahday:
_____

Waxaan helay macluumaadka la socda buugga *macluumaadka loogu tala galay dadka loo qoray qalabka wax caawiya* waxaana aqbalay in aan raaco shuruucda lagu sheegay buugga. Waxaan ahaan doonaa diyaar waqtiga aan kula heshiiyay shaqaalaha Hjälpmedelscentrum in aan keeno, aan soo qaato ama dayactirka qalabka la samaynayo.

Taariikhda	Taariikhda
Saxiixa amaahdaha	Saxiixa cidda qortay
Magaca oo xarfo waawayn ah	Magaca oo xarfo waawayn ah

Laba nuqul oo heshiiska la sameeyey ah. Amaahduhu waxa uu la harayaa mid kamid ah.

Heshiiska ku saabsan waajibaadka marka la amaahanayo qalabyada wax caawiya

Qalabka wax caawiya ee la qoray:
_____

Lambarka qalabka: _____

Magaca Cida Amaahatay: _____

Lambarka aqoonsiga shakhsi ahaaneed ee qofka amaahday:
_____

Waxaan helay macluumaadka la socda buugga *macluumaadka loogu tala galay dadka loo qoray qalabka wax caawiya* waxaana aqbalay in aan raaco shuruucda lagu sheegay buugga. Waxaan ahaan doonaa diyaar waqtiga aan kula heshiiyay shaqaalaha Hjälpmedelscentrum in aan keeno, aan soo qaato ama dayactirka qalabka la samaynayo.

Taariikhda	Taariikhda
Saxiixa amaahdaha	Saxiixa cidda qortay
Magaca oo xarfo waawayn ah	Magaca oo xarfo waawayn ah

Laba nuqul oo heshiiska la sameeyey ah. Amaahduhu waxa uu la harayaa mid kamid ah.